


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa



Boqoradii
Wanaagsanaa,
Boqoradii
Xumaa



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.



Maalin laga xmado bay u ahayd Manaseh.
Aabbihi, boqor Xisqiyah kolkaa unbuu
dhintay. Iminka, wiil da'diisu tahay laba
iyo toban jir keliya, Manaseh
ayaa boqr u cusb u noqday
dadkii Ilaah ee Yuhuudda.
Taana ma uusan garnaynin,
laakiin Manaseh waxay
ahayd inuu boqr u haado
55 sanadood. Manase Ilaah
caawimaad buu uga baahnaa
si uu u noqdo boqr wanaagsan.



Laakiinse Manaseh wuu iska dhaga tiray taasi oo wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar ku ahaa. Manaseh wuxuu dib u dhisay oo dayactray meelihii allabariga ee sanamyada lagu caabudi jiray. Xitaa wuxuu sameeyey sawiro la xardhay oo dhigay Macbudkii

qudduuska ahaa ee Ilaah!

Ilaah oo taas ku yidhi

Muuse, "Waa inaadan

samaynin sawir sanamo la




xardhay. Waa

inaadan u


sujuudin kuwaas

oo aadan u


adeegin."



Manaseh wuxuu ku
dhaqmay isticmaalka
sixer iyo faal. Dadkiina
wuu ka fogeeyey Ilaah.
Xitaa boqrku wuu gubay
wiilashiisa si u qurbaan
gu bixiyo sanamyada.
Si weyn bayna
cadhadii Ilaah
ugu sii korodhay.



Markii ii dadkiisii ku caasiyeen, Ilaah wuxuu u ogolaaday iyaga in la ciqaabo. Taasi weeye waxa qabsaday oo ku dhacay Manaseh iyo dadkii uu xukumayayba. Rabbiga wuxuu u soo diray ciidankii Ashuur inuu qabsado. Mnaseh waa la qaatay isagoo silsilado iyobircago ku xidhan yihiin oo Baabiloon baa loo kaxaystay.





Oo intuu dhibaataysnaa buu
Rabbiga bayay, Ilaahiisii.
Aad buuna isu hooseysiiyey
Ilaah Awoowayaayiisha
hortiisa, oo Isagii buu
baryay, oo Isna wuu aqbalay
isaga. Ma sii jireyso
baryada sanamyada!
Laakiinse Ilaaha nool
ma u jawaabi doonaa
sharkii Manase ka dib.




Haa! Wuu maqlay Ilaah
baryadii boqorka oo wuxuu dib
ugu soo celiyey Yerusaalem.
Kursigii boqortooyada, dadkiii
uu xukumayay. Dabadeed
markaasuu Manaseh ogaaday
in Rabbiga Ilaah yahay.




Boqr Manseh iminka waa qof cusub. Wuxuuna dibadda uga saaray macbudkii Ilaah sanamkii iyo ka soo ururiyey sanamyadii Ilaahyada qalaad dhamaan magaaalada Yerusaalem yiilay. Kulligoodna wuu ka bixiyey. Wuxuuna dayac tiray meeshii allabariga ee Rabbiga oo wuxuu ku dul bixiyey qurbaanno nabaadiino ah iyo qurbaano mahadnaqid ah.



Deedna wuxuu ku amray dadkii inay
u adeegaan Rabbiga Ilaaha Israa'iil.
Bal eega isbedelka ku dhacay Manaseh.




Markii Manaseh dhintay, willkiisii, Aamoonna, ayaa ku soo noqday sanam caabuddii. Laakiinse isagu iskuma hooseysiin Rabbiga hortiisa sidii Aabbihiis oo kale. Sida Aamoon uu aad iyo aad u dembaabay ayay addoommadiisii ugu dambayntii ku dileen gurigiisa dhexdiisa. Waxa uu boqor ahaa laba sano oo keliya.



Boqrkii kale eek u xigayna,
Yoosiyaah, waxay da'diisa
ahayd oo keliya siddeed
sano. Wuxuuna wadaanka
xukumayay muddo ku siman
31 sanadood oo wuxuu
sameeyey wax Ilaah hortiisa
ku quman oo wanaagsan.
Wuxuuna dhamaan dumiyay
meelihii Ilaahyada beenta
ah lagu caabudi jiray iyo
weliba macbudyadii
beenbeenta ahaa.




Boqrkii wanaagsanaa ee Yoosiyaah wuxuu nadiifiyey
oo dayactiray Macbudkii Ilaah. Iyo wasakhdii
dhextiilay oo idil wadaad baa helay kitaabkii
sharciga ee Ilaah siiyay Muuse.




Markii uu boqorkii maqlay
erayada sharciga Ilaah,
isagu dharkisii buu jeexjexay
ka xumaasho darteed.

Yoosiyaah wuxuu gartay inta
ay la ekeyd xumaantii ay
awooyayaashiisii sameeyeen
oo ay ku caasiyeen
sharcigii Ilaah.



Nabi la yidhaahdo Xuldaah Ilaah u soo dhiibay
farriin ku socota Yoosiyaah. "Raabbigu wuxuu
leeyahay. Bal eeg, belaayaan ku soo dejin doonaa
meesha iyo dadka degan ba, taas oo ah kulli
habaarada ku qoran kitaabkii boqrka Yuhuudda
hortiisa lagu akhriyey oom dhan,
maxaa yeelay, iyagu way iga
tageen." Laakiin Yoosiyaah wuu


ishooseysiiyey oo daacad buu
yahay, tani kuma dhacayso
ilaa ka dib uu isaga
dhinto mooyaane.



Ilaah wuxuu ku caawiyey Yoosiyaah dadkiisa
hogaaminta dadkiisa inay u soo noqdaan Ilaah.
Maalin baa, isaga oo ciidankiisa hoggaan dagaal
u haya, ayuu six un ugu dhaawacmay
fallaarihii cadowga ku soo
ganayeen. Adeegayaashiisii
baa gaari fardood ugu qaaday
aqalkisiisoo oo Yerusaalem
buu ku dhintay. Dadkiisii
oo idilna way u baroorteen
tacsidiiisii, oo gabayo iyo
heeso bay ka tiriyeen
waxyaabihii ku saabsanaa


maamul wanaagii
boqor Yoosiyaah.





Inyar ka dib markii lga
joogay wakhtigaa, wey
idlaatay boqrtooyadii.
Laakiinn qof baa, boqor
baa u talin doonay
Israa'iil. Magaciisana
waxaa la odhan jiray
BOQRKII BOQRADA,
IYO RABBIGA
RABBIYADA.





Markii Ciise Markii
Ciise Masiix yimid
markeedii ugu
horreysay, Isaga waa
la diiday oo la qodbay.
Markii mar labaad uu
yimidna, ma uusan
ahayn oo keliya
boqorka Israa'iil,
laakiin idil dunida
oo dhan.



Boqoradii Wanaagsanaa, Boqoradii Xumaa

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Taariikhda Labaad 33-36

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

